

## Waalidiinta sharafta leh ee dhalay carruurta barbaarinta hore ku jirta!

Xilligii waxqabadka xagaaga barbaarinta hore ee Vantaa waa uu dhammaanayaa, waxaana bilaaban doona xilli cusub oo waxqabad. Dhammaan xannaanooyinka caadiga ah, kuwa albaabadoodu furan yihiin iyo beeraha nasashada mar kale ayaa dib loo furay 3.8.2020, goobaha naadiyada (kerhotoiminta) waxaa la bilaabayaa 13.8.2020. Dhammaanba carruurta oo dhan iyo qoysaskaba waxaan fasaxii xagaaga kaddib si diiran ugu soo dhaweyneynaa adeegyadeenna kala duwan ee aan ugu talaggalnay xilligaan cusub.

Sharciga barbaarinta hore iyo sharciga laga dejiyay taageerada ku daryeelidda guriga ee ilmaha iyo daryeelka khaaska ah, waxaa uu isbeddalayaa 1.8.2020. Isbeddelka sharciga barbaarinta hore lagu sameynaayo waxaa loola jeedaa, in dhammaan carruurta oo dhan ay xuquuq shakhsi ahaaneed u leeyihiin waxbarashada barbaarinta hore oo waqtiga oo dhan ah ama dhammeystiran. Sharci beddeliddaas la sameeyay wax isbeddel ah kuma keoneyso magaalada Vantaa, waayo magaalada Vantaa dhammaan carruurta oo dhan hore ayay xaq ugu lahaayeen barbaarinta hore ee waqtiga oo dhan ah ama dhammeystiran.

Xilligii koronaha ee gu’gii la soo dhaafay qaar kamid ah carruurta waqti aad u dheer ayay ka maqnaayeen barbaarinta hore iyo waxbarashada horeba, sidaas darteed waa in tixgelin gaar ah la siiyaa ku soo noqoshada ilmaha ee barbaarinta hore. Waxaa dhici karta in waalidku u baahan yahay wadahadal ku saaban xaaladda ilmaha, Haddaba waxaad shaqaalaha barbaarinta hore ka qabsan kartaa ballan ku saabsan waqtiyo dheeraad ah oo laga wada hadlo xaaladda ilmaha ee barbaarinta hore.

Carruurta cusub ee bilaabaysa barbaarinta hore/waxbarashada hore iyo nidaamkii ahaa soo barashada goobaha barbaarinta iyo waxbarashada

Xaaladdii aan caadiga aheyn ee lagu jiray gu’ga awgiis/xilligaan xagaaga waxaa gebiahaanba la joojiyay booqashooyinkii ay carruurta cusub ku soo baranayeen goobta barbaarinta hore. Vantaa waxaa ka jiray nidaamka ah tilmaanbixinta waxqabadka ee marka carruurta ay bilaabayaan barbaarinta hore, kaasoo ahaa mid lagu saleynaayo raacidda nidaamka nadaafadda caafimaadka ee xilliga cusub ee howlqabadka ee bilaabanaaya.

Xilliga deyrta soo barashada goobaha barbaarinta hore /waxbarashada hore, waxaa lagu hirgelin karaa muddo aad u dheer bannaanka xannaanada. Waxaa intaas dheer in soo barashada goobta lagu hirgelin karo wadaxiriir dhanka internetka ah oo dhex mara waalidka iyo shaqaalaha hadba sida ugu suurtaggalsan, ama iyadoo laga faa’iideysanaayo dhanka

wargelin siinta. Xilliga lagu guda jiro soo barashada goobta barbaarinta, waxaa waalidku isagoo ay wada socdaan ilmihisa uu soo baran karaa goobta barbaarinta hore, waxqabadka kooxda carruurta ah, shaqaalaha iyo ilmaha kaleba. Waalidka waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay carruurtooda kula ciyaaraan bannaanka xannaanada, xitaa marka uu dhammaado waqtiga howlqabadka.

Xilliga deyrta waalidka iyo ilmhuba waxaa ay soo baran karaan goobaha barbaarinta hore iyadoo shaqaaluhu ay hagayaan, islamarkaana raacaya tilmaanbixinta dhanka nadaafadda caafimaadka ku saabsan. Vantaa gudaheeda waxaa qaab ahaan soo barashada goobta barbaarinta hore laga itsicmaala nidaamka ah, hal qof oo shaqaalaha ka mid ah ayaa qaabilaya qoyska iyo ilmaha ay dhaleen kaligood, waxaana soo barashada goobta ay dhaceysaa, iyadoo aanay goobtaas joogin wax carruur ah ama dad waaweyn oo kale. Waxaa la iska ilaalinayaa qaababkii wax loo qaban jiray xilliga soo barashada goobta sida taabashada ama tusaale ahaan in qaab koox ahaaneed loo ciyaaro.

Qofka caafimaadka qaba kaliya ayaa soo baran kara xannaanada carruurta iyo xannaano-qoyseedkaba.

#### Waxqabadka kooxaha carruurta

Keenista iyo soo doonista carruurta waxaa ay ku dhici doonaan qaabka ku habboon waax walba, iyadoo wadashaqeynta arrinkaas ku saabsan lala yeelan doono waalidka. Nidaamkii ahaa in waalidku aanay gabi ahaanba imaan karin xannaanada/gudaha waaxda, meesha waa laga saarey. Si kastaba marka carruurta la keenaayo xannaanada iyo marka laga soo kaxeynaayaba waa in tixgelin gaar ah la siiyaa nadaafadda caafimaadka iyo in la yareeyo wadaxiriirka.

Kooxaha carruurta waxaa ay ku shaqeyn doonaan sidii caadiga aheyd oo ah kooxo yar xilliga maalinkii ah. Marka shaqada la qabanaayo waxaa la yareyn doonaa wadaxiriirka, iyadoo hawlaha lagu sameyn doono sida ugu badan bannaanka xannaanada, iyo in xilliga maalinkii ah bannaanka la soo socsoco. Bannaan soo socsocoshada waa la kala horreysiin doonaa, si looga hortago in kooxaha oo dhan ay hal mar bannaanka isugu tagaan.

Cunitaanka raashinka, shaqaalaha ayaa carruurta u qeybinaaya cuntada. Carruurta ma soo qaadan karaan cuntada, mana taaban karaan weelasha iyo alaabaha wax lagu cuno ee dadka kale. Haddii cunuggu uu ka maqan yahay barbaarinta hore ama waxbarashada hore, kama uu qeyb qaadan karo cunto cunista ka dhaceysa goobaha barbaarinta hore ama waxbarashada hore.

Boombalaha carruurta ku seexdaan (unilelu) oo nadiif ah, haddii loo baahdo waa loo soo qaadan karaa xannaanada si ilmaha yar loogu dhigo xannaanada dhexdeeda. Boombalaha

hurdada waxaa uu wax katarayaa gaar ahaan carruurta cusub ee bilaabeysa barbaarinta hore, sidii ay carruurta u heli lahaayeen dareen ammaan leh oo u sahlaya in ilmuhu uu si fudud ku seexo. Alaabaha kale ee carruurta ku ciyaarto lama keeni karo xannaanada carruurta illaa iyo amar dambe.

Sida ay tilmaanbixinta ku sheegtay hay'adda caafimaadka iyo nololwanaagga (THL), ilmuhu waa in uu guriga joogaa, xitaa haddii uu leeyahay astaamo hargabka oo fudud. Ilmaha waa in sida ugu fudud loo geeyo baaritaanka koroona. Ilmaha waxaa xannaanada lagu soo celin karaa, marka uusan lahayn wax astaan ah muddo afar iyo labaatan saacadood gudahood ah. Ilmaha uu ku dhacay feyruska korona, waa in uu barbaarinta hore ka maqnaadaa ugu yaraan toddoba maalmood laga soo bilaabo markii astaamaha xanuunku ku bilowdeen, laakiin haddii loo baahdo intaa ka badan ayuu ka maqnaan karaa, waana in uu ugu yaraan laba maalmood ahaadaa mid aan laheyn wax astaamaha xanuunka ah, kahor inta uusan ku soo laaban barbaarinta hore. Carruurta ku jirta kooxda u nugul halista cudurada, qiimeyntooda caafimaad ahaan ee ka qaybqaadashada arrimaha barbaarinta hore waxaa ay ku saleysnaan doontaa, qiimeynta ay arrinkaas ka sameeyeen qolada ka mas'uulka ah daryeelka carruurta.

Si kasta oo nadaafadda caafimaadka loo xoojiyay, haddana waxaan ka taxaddari doonaa, in ilmuhu helo u soo dhawaanshaha qofka weyn ee uu u baahan yahay, amni iyo wadaxiriir, si la mid ah sidii awal uu u heli jirey oo kale.

## Wadashaqeynta annaga iyo waalidka

Qorshaha barbaarinta hore ee ilmaha (vasu), wadhadallada iyo qorshaha waxbarashada ilmaha ku jira waxbarashada hore ee loo yaqaan (LEOPS), waxaa wadhadallada arrimahaas ku saabsan oo dhan waalidka lala yeelan doontaa xilliga deyrta. Xilligii gu'ga la soo dhaafay ee lagu jiray xaaladda aan caadiga aheyn, waxaa wadhalladu ay noogu dhaceen si guul leh, iyadoo lagu galay dhanka internetka. Sidoo kalena annagoo isticmaalayna qaabkaas aan soo sheegnay, ayaan haddana ku dhinac wadi doonaa wadhalladii caadiga ahaa.

Xilliga deyrta ah waxaa barbaarinta hore iyo waxbarashada horeba laga qabanqaabin doonaa kulamo lala yeelanaayo waalidka, kuwaasoo qaabka lagu hirgelinaayo lagala heshiinaayo waaxda barbaarinta hore.

Ilmaha ku jira karantiilka ama xaaladda gaarka ah waxaa lagala soo xiriirayaa goobta barbaarinta hore. Qaabka wadaxiriirka waxaa si gaar ah isula meeldhigaaya waalidka ilmaha dhalay iyo shaqaalaha goobta barbaarinta hore.

Macallinkii uu yaqaannay, saaxibadiis iyo xannaanada oo uu tusaale ahaan ka arko dhanka wadaxiriirka fiidiyowga, ayaa ilmaha yar u noqon karta arrin aad muhiim ugu ah. Farriimo ilmaha uga yimaada kooxda barbaarinta hore ama waxbarashada hore, ayaa wax ka tareysa dareenka ilmaha yar ee ah in uu ka tirsan yahay kooxda, waxaana ay ka khafiifineysaa hilowga

ama boholyowga uu ilmuhu u hayo saaxiibadiis, shaqaalaha xannaanada iyo hawlihii uu ka qabanaayay xannaanadaba.

**Salaan ka timid dhakhtarka sare ee cudurrada faafa Kirsi Valtonen oo ku wajahan waalidiinta carruurtoodu dhigato xannaanada (juun 2020)**

Xaaladda korona ee Vantaa si wanaagsan ayaa loo maareeyay, waxaana dhakhtarka sare ee cudurrada faafa Kirsi Valtonen ay ku dhiirigelinaysaa waalidiinta in ay carruurtooda keenaan xannaanada carruurta iyo goobaha waxbarashada hore (esikoulu). Xannaanooyinka iyo iskuuladu ma ahan goobaha muhiimka u ah faafitaanka xanuunka. Waxaa Valtonen ay sheegtay, in xanuunkan korona uu qaaditaankiisa ku yar yahay dhanka carruurta, marka loo eego dadka waaweyn. Xaaladaha xanuun ee aadka u adag ee uu keeno feyruska korona si aad ah ayuu ugu yar yahay dhanka carruurta, mana jirto wax xaalad khatar ah oo dhanka carruurta ah oo uu sababay feyruska korona oo ka dhacay magaalada vantaa. Xaaladdii aan caadiga aheyn ee xilligii gu'ga la soo maray kaddiib, waxaa carruurta muhiim u ah, in ay tagaan xannaanada si ay wax u soo bartaan una soo ciyaaraan. Halkaan ka daawo fiidiyowgaan oo dhan ([waa luqadda finishka](#)).

Warbixin dheeraad ah waxaad ka heleysaan goobta barbaarinta hore ee ilmahaaga.

Ku soo dhowaada barbaarinta hore!

Salaan kal laab ah iga gudooma, Sole Askola-Vehviläinen

Madaxa barbaarinta hore